



Llywodraeth Cymru
Welsh Government

www.gov.wales

Imtixaannada Akhriska iyo Xisaabta ee Wales

**Macluumaadka waalidiinta
iyo daryeelayaasha ee
carruurta fasallada 2 ilaa 9**

mae addysg
yn dechrau
yn y cartref
education
begins
at home

Somali

Tusmada

Sababtee ayaan imtixaannada qaranka ee Wales u haysanaa?.....	3
Maxay u eg yihiin imtixaannadu?	4
Goorma ayaa imtixaannada la qaadayaa?	5
Miyay dhammaan carruurta samaynayaan imtixaannada?	5
Maxay imtixaannadu iiga sheegayaan arrinta ku saabsan waxbarashada ilmahayga?	6
Sidee ayaan ku ogaanayaa sida ilmahaygu ku ahaayeen imtixaannada?	7
Waa maxay heerka caadiga ah ee buundooyinku?	8 - 9
Waa maxay buundada hore-u-socoshada?	10 - 11
Miyay tahay inaan ka caawiyo ilmahayga diyaarinta imtixaannada?	12
Ma ka caawin karaa ilmahayga hagaajinta akhriskooda iyo xisaabtooda?	13
Xiriirrada muhiimka ah.....	14



Macluumaadka waaalidiinta iyo daryeelayaasha

.....

Carruurta Fasallada 2 ilaa 9 waxay hadda sameeyaan imtixaannada qaran ee akhriska iyo xisaabta xagaa kasta. Macluumaad-sidahan wuxuu sharaxayaa waxa ay imtixaannadu ku saabsan yihiin iyo waxa maxsuullada imtixaannadu kaaga sheegi karaan arrinta ku saabsan waxbarashada ilmahaaga.



Sababtee ayaan imtixaannada qaranka ee Wales u haysanaa?

Dugsiyadu waxay had iyo goor u isticmaalaan imtixaannada inay eegaan sida wanaagsan ee carruurta waxbarashadoodu tahay. In la sameeyo imtixaano qaran oo gaar ahaan laga isticmaalo Wales macnaheedu waa in macalimiinta dhammaan dugsiyada ay helaan macluumaad isku mid ah ee ku saabsan xirfadaha akhriska iyo xisaabta ee ardaydooda. Imtixaannadu waxay muujinayaan halka carruurta qof ahaan ay uga baahan karaan caawinaad dheeraad ah si ay u hagaajiyaan xirfadooda. Dugsiyadu waxay is barbar dhigi karaan heerka gaaritaanka akhriska iyo xisaabta ee dugsiyadooda waxa ka dhacaya degmooyinkooda.



Maxay u eg yihiin imtixaannadu?

Akhriska



Imtixaannada akhriska waxay ka kooban yihiin su'aalo gaaban kuna salaysan qoraalo laba ama ka badan ah. Qaar su'aalaha ah waxay eegayaan sida wanaagsan ee loo fahmay sheekada halka qaar kalena ujeeddadu tahay in la ogaado in carruurta ay qiimayn karaan arrinta ku saabsan waxa ay akhrinayaan. Ka hor bilaabidda imtixaanka, carruurta waxay samayn karaa su'aalo tijaabo ah si ay u ogaadaan waxa ay u eg yihiin noocyada su'aalaha kala duwan iyo waxa la is waydiin karo.

Waxaa jira imtixaanno akhris oo labadaba Ingiriis iyo Weelish ahaanba. Imtixaan kasta wuxuu qaadanayaa ilaa saacad laakiin carruurta yaryar waxay qaadan karaan nasasho marka qaybahaan la dhammeeyo. Carruurta Fasallada 4 ilaa 9 ee dugsiyada dhexe Weelish waxay ku qaadanayaan imtixaannada labada luuqadoodba. Carruurta Fasallada 2 iyo 3 waxaa kaliya laga sugayaa inay sameeyaan kaliya imtixaanka akhriska Weelishka in kasta oo dugsiyadu ay dooran karaan inay u oggolaadaan ardayda Fasalka 3 inay sameeyaan sidoo kale imtixaanka Ingiriiska.

Xisaabta

Waxaa jira laba nooc oo imtixaanno xisaab ah.

1. Imtixaannada nidaamka waxay cabbirayaan xirfadaha lambar ahaan, xirfadaha cabbirida iyo macluumaadka.
2. Imtixaanka sababaynta wuxuu cabbirayaa sida wanaagsan ee carruurta u isticmaali karaan waxa ay ka garanayaan sida loo xalliyo dhibaatooyinka maalin kasta.

Tarjumaado Af-Ingiriis iyo Af-Weelish ah ayaa loo helayaa labada imtixaanba. Imtixaan kasta ee xisaabta ah wuxuu soconayaa ilaa saacad barkeed, laakiin mar kale, carruurta yaryar waxay qaadan karaan fasax kooban inta imtixaanka lagu jiro.



Miyay dhammaan carruurto samaynayaan imtixaannada?

Inta badan carruurto waa inay samayn karaan imtixaannada, laakiin qaarkood waxay u baahan karaan qorshayaal helitaan oo gaar ah. Tusaale ahaan, qaybaha farta-waawayn iyo farta Indhoolayaasha ee imtixaannada ayay helayaan carruurta qaba dhibaato indhahooda ah. Tiro aad u yar oo carruurta ah ayaa aan geli karin imtixaannada. Maamulayaasha dugsiyadu waxay si taxadar leh u tixgelinayaan haddii qaar carruurta ah ay galayaan hal ama ka badan ee imtixaannada ah.

Goorma ayaa imtixaanku dhacayaa?

Dugsiyada Hoose waxay siinayaan imtixaannada ardaddooda waqtiga ka bilowda **5 ilaa 12 Maajo 2015**. Dugsiyada sare iyo dhexe waxay siinayaan imtixaannada ardaddooda waqtiga ka bilowda **29 Abriil ilaa 12 Maajo 2015**. Waqtigan gudahiisa, waxay u taallaa dugsiga inuu jadwal u sameeyo imtixaannada waana inay kuu sheegaan taariikhaha marka uu ilmahaagu u fariisanayo imtixaannada Carruurto waxay imtixaannada ku gali karaan kalaasyada kooxeedka ama kooxo ballaaran, laga yaabee gudaha hoolka dugsiga.



Maxay imtixaannadu iiga sheegayaan arrinta ku saabsan waxbarashada ilmahayga?

Imtixaannadu waxay bixin karaan macluumaad waxtar leh si loogu daro waxa macalinka ilmahaagu ka yaqaan akhriskooda iyo xisaabtooda shaqo maalmeedkooda fasalka gudihiisa. Macalimiintu waxay u isticmaali karaan maxsuullada aqoonsiga awoodahooda iyo weliba meelaha ay uga baahan yihiin caawin dheeraad ah. Waxay kula wadaagi karaan macluumaadkan waqtiga kulamada waalidiinta.

Hase yeeshee, imtixaan kasta wuxuu kaliya eegi karaa qaybo kooban oo xirfadaha iyo kartiyada ah. Imtixaannada akhriska wax macluumaad ah kama bixin karaan arrinta ku saabsan xirfadaha ku hadalka luuqadda, dhagaysiga iyo qoritaanka. Imtixaannada xisaabaadka kama imtixaani karaan fahamka ilmahaaga ee inta wax isku jiraan iyo qaababka. Qaar carruurta ah ayaan ku fiicnaan karin sidooda ugu fiican maalinta imtixaanka. Taas darteed, maxsuullada imtixaannadooda kaliya ma ka bixin karaan sawir buuxa kartidooda. Imtixaan kasta waxaa loo qaabeeyay cabbiridda qaybo kala duwan ee koox sannadeed kasta. Imtixaannadu mar kasta kama bixinayaan macluumaad lagu kalsoonaan karo carruurta ku shaqaynaya darafyada u kala shisheeya, ama ka baxsan da'dooda kala duwan.

Waa muhiim in lagala hadlo ilmahaaga horumarkiisa macallinkiisa taasoo ku salaysan dhammaan caddaymaha ay hayaan, halkii kaliya laga eegi lahaa maxsuulka hal imtixaan kaliya. Sidoo kale waa muhiim in la xasuusnaado in carruurta aysan dhammaan u hormarayn si isku mid ah.



Sidee ayaan ku ogaanayaa sida ilmahaygu ku ahaayeen imtixaannada?

Dhammaadka xilli-waxbarashada xagaaga, dugsiga ilmahaaga wuxuu ku siinayaa maxsuullada imtixaannada ee imtixaan kasta ee uu ilmahaagu sameeyay. Maxsuullada waa in lala akhriyaa warbixin sannadeedka ilmahaaga.

Imtixaannadu waxay bixiyaan laba nooc ee buundooyin ah, buundo heer caadi ah iyo buundo heer sare ah. Labadan buundo aad ayay uga duwan yihiin buundooyinka aad hore ugu tiqiin xaaladaha kale, tusaale ahaan 9 ee ka 10 ama 65%.



Waa maxay heerka caadiga ah ee buundooyinku?

Haysashada buundo tusaale '6 10 kiiiba' ma xisaabinayso sida imtixaanku u adkaa ama ma tusayso sida uu ilmo sameeyay marka loo barbardhigo carruurta kale ee imtixaanka samaysay. Haddii kuwa kale ee imtixaanka sameeyay ay buundadoodu noqoto 9 10 kiiiba, marka 6 ma ahan buundo wanaagsan. Laakiin buundada dhexdhexaadka ah ay ahayd 2 10 kiiiba, markaa 6 waa buundo aad u fiican. Buundada caadiga ah ee imtixaannada qaranka waxay kuu sheegaysaa sida wanaagsan ee ilmahaagu u sameeyeen

marka loo barbardhigo carruurta kale ee isla da'da ah (ee sannado iyo bilo) ee samaynaya imtixaanka isla waqti. Buundada caadiga ah waxaa lagu habeeyay 100 iyadoo saddex-meelood laba oo dhammaan carruurta samaynaysa imtixaanka waxay leeyihiin buundooyin caadi ah ee inta u dhaxaysa 85 iyo 115. Sidaas darteed, buundo caadi ah ee ka hoosaysa 85 **waxay ahaan kartaa** mid sheegaysa waxoogaa adkaan ah akhriska ama xisaabta sida lagu cabbiray imtixaanka.



Kiisas yar, qaybaha adkaanta ee su'aalaha ee imtixaanka ay macnaheedu tahay inaysan macquul ahayn u diiwaan-gelinta buundo caadi ah ee ilmo kaasoo xirfadihiisa akhriska iyo xisaabta ay u horumarayaan si aad tartiib u ah marka loo eego sida laga doonayo. Buundada waxaa kaliya oo la siin karaa sidii 'ka yar 70'. Haddii tani tahay sidaas, macallinka ilmahaaga wuxuu isticmaalayaa qaabab kale uu ku qiimaynayo sida xirfadahoodu u horumarayaan. Mid ka mid ah waxyaabaha macallin samayn karo waa inuu u oggolaado in ilmahaagu sameeyo isku dayga su'aalaha imtixaan kooxda sannadeed ka hoosaysa si loo eego haddii tani caawinayo helitaanka sawir fiican ee halka ay uga baahan karaan caawinaad dheeraad ah si horumar loo sameeyo.



Si taas u eg, kuwa buundada sare keena waxaa kaliya ee la siin karaa buundo caadi ah ee 'in ka badan 140' sababtoo ah imtixaanku ma cabbirayo xadka xirfadooda. Mar kale, macallimiintu waxay ku siin karaan macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan kartida ilmahaaga.

Waa maxay cabbirka hore-u-socoshada?

Cabbirka hore-u-socoshada ee imtixaanka wuxuu muujinayaa sida uu sameeyay ilmahaagu marka loo eego arday kale ee kasta ee sameeyay imtixaanka isla sannadkiisa ama isla sannadkeeda. Markii la eego cabbirka hore-u-socoshada ee sannadba sannad kale waxay kaa caawinaysaa helitaanka sida ilmahaagu ugu guulaysto imtixaannada waqti kasta. Cabbirada hore-u-socoshada ee guud ahaan sannadba sannadka ka dambeeya isku eg waxay sheegayaan in ilmahaagu samaynayo hore-u-socoshada caadi ah ee sannad kooxooda. Kala duwanaansho yare e sannadba sannadka kale ah ayaa la fili karaa. Haddii imtixaan sixitaanka ilmahaaga ay isku

mid yihiin bologiyada la xardhay sannadba sannadka kale tani macnaheedu waa in ilmahaagu ay ku ekaanayaan booskooda sannad kooxooda. Dhaqdhaqaaq inta dhaxaysa bologiyada la xardhay ee sannadaha (kor u socoshada ama hoos u socoshada) waxay sheegaysaa in ilmahaagu ka faa'iidayo caawinaad wayn ama jaribaad. Macalinka ilmahaaga ayaa kaala hadli kara si aad u faahfaahsan arrinta ku saabsan qaababka ay hore-u-socoshada u samaynayaan ee dhammaan arrimaha akhriska ama xisaabta (kaliya aan ahayn imtixaanka waxa ku saabsan) iyo waxa la samayn karo si looga caawiyo hagaajinta xirfadahooda.



Fasiraadda shaxda cabbirka hore-u-socoshada

Nidaamka cabbirka hore-u-socoshada xisaabta


Si aad ah ka sarreeya heerka celceliska ee koox sannadeedka

Ka sarreeya heerka celceliska ee koox sannadeedka

Heerka celceliska ee koox sannadeedka

Ka hooseeya heerka celceliska ee koox sannadeedka

Si aad ah uga hooseeya heerka celceliska ee koox sannadeedka



Shaxdan tijaabada ah waxaa laga soo qaaday waraaqda maxsuullada ee la siiyay ilmo kasta ee sameeyay imtixaannada. Buundada aasaasiga ah ee ilmaha ee 2013 iyo kaddib cabbirka hore-u-socodka ee ilmo kasta kaddib markii la saxay sida fallaarta is-dhaafsan ee meelaha boloogyada la xardhay si loo muujiyo wanaagooda imtixaanka marka loo eego ardayda kale ee Marhajka Qaranka ee Sannad Kooxeedka (National Curriculum Year group). Shaxdan wuxuu muujinayaa in buundooyinkooda ee imtixaanka Nidaamka Xisaabta ay waafaqsan tahay heerka celceliska ee sannad kooxeedkooda ee mid kasta ee saddexda sano. Saddexda sanaba waxay samaynayaan horumar si la filayay iyagoo ku sugan booskooda sannad kooxeedkooda.



Miyay tahay inaan ka caawiyo ilmahayga isu-diyaarinta imtixaannada?

.....

Maya. Imtixaannadu waa kaliya hal qayb oo caddayn ah ee ku saabsan heerka gaaritaanka ilmahaaga Qaabka ugu haboon ee aad u diyaarinayso ilmahaaga waa xaqiijinta inaysan welwelin ama baqin.





Ma ka caawin karaa ilmahayga hagaajinta akhriskooda iyo xisaabtooda?

Haa, si aad ah! Inaad ka qayb qaadato waxbarashada ilmahaaga marka ay guriga joogaan iyo marka ay bannaanka joogaanba waxay ku samayn kartaa isbededdel wayn hor-u-socodkooda. Mid ka mid ah kuwaan soo socda waa caawin ballaaran.

- Akhrinta iyo ka hadlidda arrinta ku saabsan wax kasta oo qoraallo ah sida buugaag, jaraa'ido, boggag-internet, macluumaad-sidayaal, ogaysiisyo
- Isticmaalidda lamabaro marka la adeeganayo, socdaallo la qorshaynayo, la fiirsanayo buundooyinka kubadda cagta, waqtiyaga barnaamijyada TV-ga.
- Wadaagidda hawlo ku saabsan akhriska iyo xisaabta sida cunto-karinta, ciyaaridda cayaaro sabuurad, fiirsashada ama cayaaridda cayaaro, qoritaanka iimaylo.
- ka hadlidda erayo ama tirooyin aad la kulanto nolol maalmeed kasta.
- Wixii fikrado caawinaadeed ee carruurtaada waqtiga guriga oo leh hawlo madadaalo booqo bogga internet-ka www.facebook.com/beginsathome

Xiriirrada muhiimka ah

Waxaad ka heli kartaa talo-bixin dheeraad ah iyo hagitaanba ee caawinta ilmahaaga ee akhrinta iyo xisaabta adigoo booqanaya boggagan internet ee soo socda.

Waxabarashadu waxay ka bilaabataa guriga (Education begins at home).

Tarrimaha aad guriga ku samayso waxay ka caawinayaan ilmahaaga inay si fiican sameeyaan dugisga.

Wixii fikrado aad u fiican ah booqo:

 [facebook.com/beginsathome](https://www.facebook.com/beginsathome)

Hay'ad-buug (Booktrust) – waxay abuurtaa barnaamijyo kala duwan iyo mashaariic loo qaabeeyay caawinta dhammaan dadka da' kastaba iyo nooc kastaba ka helitaanka akhriska iyo qoraalka. www.booktrust.org.uk

Xisaabta Qaranka (National numeracy) – ka caawi ilmahaaga xisaabta.

www.nationalnumeracy.org.uk/parents (boggan internet-ka waxaa kaliya lagu helayaa luuqadda Af-Ingiriiska)

Cabbir-qaniin (Bitesize) – waa bogga internet-ka ee lacag la'aanta ee agabyada idaacadda BBC si looga caawiyo carruurta dalka UK shaqadooda dugisga.

www.bbc.co.uk/bitesize

(boggan internet-ka waxaa kaliya lagu helayaa luuqadda Af-Ingiriiska).

Akhris-jacaylka-ilmaha (LoveReading4Kids) – Waxay kaa caawinaysaa baaritaanka buugaag ay ka helayaan ilmaha kana caawinaya inay jeclaadaan akhriska.

www.lovereading4kids.co.uk

(boggan internet-ka waxaa kaliya lagu helayaa luuqadda Af-Ingiriiska.)

Xisaab-eeey (Sumdog) – waa bog internet oo bixinaya cayaaro ka dhigaya xisaabta wax lagu maadaysto Dhammaantood waa lacag la'aan in la cayaaro iyadoo leh xulasho aad dalban karto qaybo dheeraad ah. www.sumdog.com

(boggan internet-ka waxaa kaliya lagu helayaa luuqadda Af-Ingiriiska.)

Dugsiga degaankayga (My local school) – Bog internet oo siinaysa macluumaad ku saabsan horumarka dugsiyada ee guud ahaan Wales.

<http://mylocalschool.wales.gov.uk>

 [@edubeginsathome](https://twitter.com/edubeginsathome)

Estyn – ka helidda arrimo badan oo ku saabsan sida uu yahay heerka sarraynta dugsiyada ilmahaagu. www.estyn.gov.uk

Cuntada dugsiyada lacag la'aanta ah (Free school meals) – ogowhaddii aad xaq u leedahay. Booqo www.gov.wales kaddibna eeg qaybta Waxbarashada iyo Xirfadaha iyo Dugsiyada.

Isbeddel-nololeed (Change4life) – waxay ku siinaysaa fikrado iyo aalado kaa caawinaya adiga iyo qoyskaagaba inaad caafimaad iyo farxad ku sugnaataan. www.change4lifewales.org.uk

MEIC – waa adeegga khadka-caawinta xogta-la-xajiyo ee carruurta iyo dadka dhallinyarada ah ee Wales. Laga bilaabo helitaanka waxa ka socda degaankaaga ilaa caawinta la tacaalidda dhibaataynta. www.meicymru.org

Hawsha akhriska kulaylaha (Summer reading challenge) – ka caawinta akhrisk a fasaxa kulaylaha.

www.summerreadingchallenge.org.uk

Hwb – isku-tagga akhriska ee dhammaan Wales, ay ka buuxaan macluumaad waxtar leh. <http://hwb.wales.gov.uk>

Weelish ee Waaxda Agabyada Waxbarashada, Xukuumadda Weelish (Welsh in Education Resources Branch, Welsh Government)

Guddiyada Weelish iyo agabyada waxbarasho oo laba luuqadood ah si loo caawiyo dhammaan maadooyinka Manhajka Qaranka. YWaxaad ku heli kartaa macluumaadyo qaab aalad muuqaal/dhagaysi loo marayo Hwb

<http://hwb.wales.gov.uk/> iyadoo qaababka daabacan laga helayo www.gwales.com.

Wixii macluumaad dheeraad ah fadlan la xirii welshresources@wales.gsi.gov.uk